# EBT-ga Cudurka Safmarka ah

## Ee Carruurta ay Da'doodu Ka Yar Tahay 6 (2020-2021)

## Su'aalaha Inta Baddan La Isweydiiyo

La cusbooneysiiyay: Juun 2021



## Macluumaad Guud

### 1. Waa maxay barnaamijka EBT-ga Cudurka Safmarka ah ee Carruurta ay Da'doodu ka yar Tahay 6?

Barnaamijka EBT-ga ee Cudurka Safmarka ah, ama P-EBT, ayaa wuxuu dheefo cunto ah siiyaa carruurta ay da'doodu ka yar tahay 6 si loogu beddelo kharashka cuntada ee sababta u ah imaanshaha la dhimay ama xiridda xarumaha daryeelka carruurta intii lagu guda jiray sannad dugsiyeedkii 2020-21. Fadlan eeg su'aalaha 5 – 11 ee loogu talagalay macluumaadka xaq-u-yeelashada P-EBT.

### 2. Sidee ayuu kani uga duwan yahay P-EBT-ga loogu talagalay carruurta joogta iskuullada?

Barnaamijka P-EBT ee sannad dugsiyeedka 2020-21 ee loogu talagalay carruurta iskuullada dhigata wuxuu ku salesan yahay imaanshaha qof ahaaneed ee xaddidan ee uu iskuulka soo sheegay. Barnaamijka P-EBT-ga loogu talagalay carruurta ay da'doodu ka yar tahay 6 ayaa u qaadanaya in dhammaan carruurta ku jirta barnaamijka Cuntada Aasaasiga ah in ay saameysay aafada iyadoo sabab u ah imaanshaha xaddidan ama xirnaanshaha xarumaha daryeelka carruurta.

### 3. Haddii aan helo dheefaha P-EBT, miyay saameynaysaa xaaladeyda socdaalka ama iga dhigaysaa qof ay dowladda mas'uul ka tahay?

Maya. Xeerka Mas'uuliyadda Dowladda laguma dabaqi karo dheefaha P-EBT oo dheefaha P-EBT ma saameyn doonnaan xaaladda socdaalka. Tani waxaa ka mid a carruurta qaadata P-EBT-ga loo marayo Barnaamijka Gargaarka Cuntada ee uu maalgeliyo gobolka Washington.

### 4. Cunugeyga wuxuu qado ka helaa iskuulka ama Barnaamijka Headstart ama ECEAP. Miyaan weli xaq u yeellan karaa P-EBT?

Haa. Dheefaha P-EBT waa dheefo cunto oo dheeraad ah. Carruurtu waxay ka sii heli karaan cuntooyinka la qaato oo lala baxo (grab-and-go) iskuulka ama goobaha bulshada, ama cuntada xaaladda degdegga ah oo laga helo goobaha quudinta xaaladda degdegga ah ee COVID-19 ee lagu bixiyo goobaha bulshada, xitaa haddii ay qaadanayaan dheefaha P-EBT.

*Hay'adan waxaa ay bixisaa fursad loo siman yahay.*

Washington State Department of Social & Health Services

*Transforming lives*

## 5. Yaa xaq u leh barnaamijka P-EBT ee loogu talagalay Carruurta ay Da'doodu ka yar Tahay 6?

Carruurta qaadata Cuntada Aasaasiga ah ayaa waxay xaq u leeyihiin barnaamijka P-EBT haddi ay:

- Da'doodu ka yar tahay 6.
- Xubin ka yihiin qoys ku firfircoon baraamijka gargaarka Cuntada Aasaasiga ah ee gobolka Washington waqti kasta oo u dhaxeeya 1da Oktoobar, 2020 ilaa 30ka Juun, 2021.
- Deggan yihiin degmo ka dhisan iskuul ka qaybgalaya Barnaamijka Qadada Iskuulka ee Qaranka iyo Barnaamijka Quraacda Iskuulka oo leh adeegga cuntada lagu bixiyo goobta oo xaddidan.

## 6. Waxaannu ku jirnaa barnaamijka gargaarka cuntada, balse kiiskeenna waa la xiray. Miyaannu weli xaq u leenahay P-EBT?

Carruurta xaqa u leh P-EBT oo ah carruur ay da'doodu ka yar tahay 6 ayaa keliya xaq u leh P-EBT bilaha qoyskoodu uu ku firfircoonaa barnaamijka Cuntada Aasaasiga ah laga soo bilaabo bishii Oktoobar 2020 ilaa bishii Juun 2021 haddii hal iskuul oo degmadooda ku yaalla uu bixiyo adeegga cuntada goobta oo xaddidan. Qoysaska daneynaya in ay dib u codsadaan ayaa kala xiriiri kara Xarunta Adeegga Macmiilka ee DSHS 877-501-2233 waxayna ku codsan karaan telefoonka ama waxay codsigooda ku soo gudbisan karaan bartan www.washingtonconnection.org.

## 7. Waxaan horey u qaadan jiray gargaar cunto. Miyaan si otomaatik ah ugu qalmaa qaadashada P-EBT?

Waxaad si otomaatik ah u heli kartaa dheefta P-EBT haddii aad deggan tahay degmo ku yaallay ugu yaraan hal iskuul oo lahaa adeegga raashiinta goobta lagu bixiyo oo xaddidan sida lagu qeexay lambarka 5aad. Qoysaska deggan degmo aan soo marin raashiinka iskuulka oo xaddidan xaq uma yeellan doonnaan dheefaha P-EBT.

## 8. Cunugeyga wuxuu ku jiraa xarun lagu daryeelo carruurta, balse kuma jirno barnaamijka Cuntada Aasaasiga ah. Miyaannu xaq u leenahay barnaamijka P-EBT ee loogu talagalay Carruurta ay Da'doodu ka yar Tahay 6?

Maya. Dheefaha P-EBT Ee Carruurta ay Da'doodu Ka Yar Tahay 6 ayaa keliya loogu talagalay caruur ka tirsanayd qoys qaadanayaay Cuntada Aasaasiga ah intii u dhaxeysay Oktoobar 2020 iyo Juun 2021. Haddii aad aaminsan tahay in aad xaq u yeellan karto Cuntada Aasaasiga ah, waxaad kala xiriiri kartaa Xarunta Adeegga Macmiilka ee DSHS 877-501-2233 waxaadna ka codsan kartaa telefoonka ama waxaad codsigaaga ku gudbin kartaa bartan www.washingtonconnection.org.

## 9. Sideen ku oggaan karaa haddii cunugeyga uu xaq u leeyahay dheefaha P-EBT??

Carruurta xaqa u leh waxay heli doonnaan ogeysiis iyo kaarka P-EBT oo uu magacooda ku qoran yahay. Waxaan filaynaa ogeysiiska in loo diro carruurta xaqa u leh bilowga bisha Luulyo 2021. Kaarka P-EBT ayaa boostada loogu soo diri doonnaa waxyar ka-dib haddii aysan horey mid u haysan. Qoysaska waa in ay haystaan kaararkooda P-EBT maadaama dheefo P-EBT dheeraad ah laga yaabo in goor dambe la soo geliyo haddii xaaladda caafimaadka guud ee cudurka COVID-19 ee federaalka ay sii socoto. Dheefaha P-EBT lagu MA dari doonno kaararka Quest EBT ee jira.

## 10. Maxay tahay sababta ay muddo dheer u qaadato in la helo kaarka P-EBT?

Sharciga federaalka ayaa gobollada uga baahan in aysan nuqul ka sameyn ama badin dheefaha loogu talagalay carruurta horey u helay dheefaha P-EBT. Waxaannu dib-u-eegi doonnaa ardayda ku qoran barnaamijkada Headstart ama ECEAP si loo xaqiijiyo in ay helaan qaddarka dheef sax ah.

# Helidda dheeefaha P-EBT

### 11. Sideen ku heli karaa dheeefaha P-EBT ee loogu talagalay carruurta ay da'doodu ka yar tahay 6?

Qoysaska xaqa u leh uma baahna in ay codsadaan si ay u helaan dheeefaha P-EBT. Cunug kasta oo xaq u leh wuxuu heli doonnaa kaarka P-EBT oo si toos boostada loogu diri doonno cinwaanka ku qoran kiiskooda Cuntada Aasaasiga ah ee uga furan DSHS.

### 12. Waxaan horey u helnay dheeefaha P-EBT. In badan oo dheeri ah ma heli doonnaa?

Carruurta waxaa laga yaabaa in ay horey u haysteen kaarka P-EBT sababta oo ah waxay xaq u lahaayeen cunno lacag la'aan ah ama qiimaheedu jaban yahay. Waxaannu awoodi waynay in aannu bixinno dheeefaha P-EBT oo laba jeer la bixiyo, laakiin waxaannu dib-u-eegi doonnaa kiiska si aan u aragno haddii cunugga uu heli karo dheeefo badan maadaama uu yahay cunug ay da'diisu ka yar tahay 6. Haddii uu xaq u leeyahay in dheeraad ah, dheeefo dheeraad ah ayaa lagu soo shubi doonnaa isla kaarka P-EBT.

### 13. Taariikhda dheeefaheyga miyaa dib la iigu celin karaa ilaa bilowga sannad dugsiyeedka (Sibtembar 2020)?

Maya. Waxaan keliya awoodnaa in aan dheeefaha P-EBT siinno carruurta ka tirsan qoyska qaata Cuntada Aasaasiga ah billaha ee cunugga si firfircoon ugu jiray Qaybta Gargaarka Cuntada Aasaasiga ah laga soo bilaabo 1da Oktoobar, 2020 ilaa 30ka Juun, 2021, sida dowladda federaalka ay ku ansaxisay aqalka congress-ka.

### 14. Maxaan u baahanahay in aan sameeyo marka kaarka P-EBT ee cusub uu soo gaaro boostada (haddii aanan horey mid u haysan)?

Raac tilmaamaha la yimaada kaarkaaga P-EBT waxaadka abuurtaa Lambarkaaga Aqoonsiga Shakhsiyeed ee amaanka ah ama PIN. Kaarkaaga hayso! Haddii barnaamijka P-EBT uu sii socdo, waxaan ku soo dari karnaa dheeefo dheeraad ah koontadaada iyo kaarka.

### 15. Miyaan sii haystaa kaarkayga P-EBT?

Haa. Dheeefo dheeraad ah ayaa la bixin karaa goor dambe oo sanandka ah. Kaararku waa in la dhigaa meel amaan ah.

### 16. Waxaan u kala qaybiyay mas'uuliyadda haynta carruurta aniga iyo waalidka kale. Kumaa adeegsan kara kaarka P-EBT ee carruurteenna?

Ilaa iyo inta xubinka qoyska ka tirsan ee ka mas'uulka ah sida waalidka kale ama daryeelaha uu helay dheeefaha isaga oo ka wakiil ah cunugga xaqa u leh, waalidiinta kale iyo daryeelayaashaba waxaa loo oggol yahay in ay adeegsadaan kaarka P-EBT ee cunugga.

### 17. Ka waran haddii aan u baahanahay kaarka P-EBT oo beddel ah iyada oo sabab u ah in uu iga lumay ama ay waxyeello gaartay?

Beddelaadda kaarka P-EBT ayaa laga shaqeeyaa iyada oo laga wacayo iibiyaha EBT, FIS, lambarkan 888-328-9271. Qoysaska ayaa sidoo kale booqan kara www.ebtEdge.com ama app-ka ebtEdge haddii kaar beddel ah loo baahan yahay. Si aad u codsato kaarka P-EBT ee beddelka ah, waxaad u baahan doontaa macluumaadkan soo socda: magaca buuxa ee cunugga, taariikhda dhalashada, sumadda degaanka iyo cinwaanka oo dhan. Cinwaanka boostada waa in uu waafaqsan yahay midka ku jira sistem-ka ee loogu talagalay in kaarka beddelka ah uu ku soo diro iibiyaha EBT. Fadlan filo toddobo ilaa 10 maalmood oo kuwa shaqada ah in aad ku hesho kaarkaaga. Ka eeg su'aasha 27aad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan goorta cinwaankaagu uusan waafaqsanayn midka ku jira faylka iibiyaha EBT, iyo kan FIS.

### 18. Miyaan dheeefahan gelin karaa kaarkeyga EBT ee cuntada ee jira?

Maya. Barnaamijka P-EBT waa mid gaar ah dheeefuhuna waxay ka duwan yihiin dheeefaha kale ee kaashka ama cuntada ee laga heli karo kaarkaaga Quest EBT.

### 19. Ma aanan helin ogeysiis. Miyaan xaq u leeyahay P-EBT?

Haddii aadan helin ogeysiiska, cunugaaga waxaa laga yaabaa in uusan xaq u lahayn. Haddii aad u maleyso tani in ay khalad tahay, fadlan kala xiriir Xarunta Xiriirka P-EBT lambarkan 833-518-0282 si aad u eegto xaq-u-yeelashadooda.

### 20. Dheefahan uma baahnin. Miyaan diidi karaa?

Waxaan ku dhiirrigelinaynaa qoysaska la go'aamiyay in ay xaq u leeyihiin P-EBT in ay u adeegsadaan dheefaha qoyska iyo in ay gacan ka geystaan kobcinta dhaqaalaha degaanka. Dheefaha cid kale looma wareejin karo lamana hadiyeyn karo ama dad laguma deeqi karo. Haddii aad weli doonayso in aad diido dheefaha, waxaad baabbi'in kartaa kaarka ama kaarka ku celi cinwaanka ku xusan xagga dambe ee kaarka. Dheefaha ayaa si otomaatik ah loo bixin doonnaa ka-dib 274 maalmood oo aanan la adeegsan.

## Qaddarada Dheefta P-EBT

### 21. Immisa ayuu cunugeyga ku heli doonnaa dheefaha P-EBT ee Carruurta ay Da'doodu Ka Yar Tahay 6?

Raashiinka ayaa loo qoondeeyay miisaaniyadda saacadaha hawlgalka iskuulka iyadoo qiimaha maalinlaha ee P-EBT-ga lagu simay $6.82. Kani ayaa ku filan qaddada, quraacda iyo cuntada fudud, oo lagu dhuftay celcelis ahaan 18 maalmood oo bil kasta la hawlgalayo. Iyadoo la adeegsanayo macluumaadka ay soo sheegeen iskuullada ee ku saabsan adeegga raashiinka goobta lagu bixiyo oo xaddidan, qaddarka dheefta P-EBT ayaa lagu saleeyay degmada uu cunuggu deggan yahay sida lagu tilmaamay kiiska Cuntada Aasaasiga iyo adeegga raashiinka ugu yar ee lagu sheegay degmada bil kasta, Oktoobar 2020 ilaa Juun 2021. Dheefaha waxay u kala duwanaan karaan degmo ilaa iyo degmo.

| Adeegga Raashiinka Degmada Ku Badan | Xisaabin | Qaddarka Lacagta ee Bil kasta |
|---|---|---|
| Barasho Meel Kale Laga Bixiyo oo Dhammeystiran ama Xiridda Iskuulka | $6.82 x 18 x 100% | $123 |
| Hal Maalin Qof Ahaan ama Laba Maalmood Qof Ahaan | $6.82 x 18 x 70% | $76 |
| Saddex Maalmood Qof Ahaan ama Afar Maalmood Qof Ahaan | $6.82 x 18 x 30% | $37 |

### 22. Maxay tahay sababta qaddarka aanan loogu saleyn imaanshaha dhabta ah ee cunugeyga ee xarunta daryeelka carruurta?

Si aynu u caawino carruurta ugu badan, ayaa waxaannu adeegsanay qaddarka caadiga ah ee degmada ee lagu abaalmariyay carruurta. Ma aanan awoodin in aynu la soconno imaanshaha xarunta daryeelka ee ardayga gaarka ah. Waxaannu adeegsanaynaa helidda adeegga raashiinka ee iskuulka si aan u sameyno mala-awaalka saacadaha xaddidan iyo imaanshaha ee loogu talagalay carruurta dhigata xarumaha daryeelka carruurta.

### 23. Miyaa la beddeli karaa ama la sixi karaa qaddarada dheefta P-EBT?

Qaddarka dheefaha P-EBT waxaa lagu saleyn doonnaa degmadii degnaanshaha ee ugu dambeysay ee ku xusan kiiskaaga Cuntada Aasaasiga ah iyo adeegga raashiinka ugu yar ee ay soo sheegeen iskuullada degmadaasi. Marka aad hesho ogeysiiska xaq u leeyashada cunugaaga, haddii aad aaminsan tahay in uu qalad ka jiray qaddarka P-EBT ee cunugaaga, waxaad ka waci kartaa Xarunta Xiriirta P-EBT lambarkan 833-518-0282 si aad uga codsato in ay dib-u-eegaan xaq-u-yeelashadaada.

### 24. Ma jiri doonnaan dheefaha P-EBT oo dheeraad ah?

Barnaamijka P-EBT ayaa sii socon kara inta ay jirto xaaladda caafimaadka guud ee cudurka COVID-19 ee federaalka. Tani waxaa ku jiri kara bilaha xagaaga. Hubso in aad u hayso kaarka cunugaaga dheefaha mustaqbalka ee suuragalka ah. Fadlan booqo www.dshs.wa.gov/pebt si aad u hesho faahfaahinno dheeraad ah.

## Xarunta Xiriirka P-EBT

### 25. Kumaan wacaa haddii aan qabo Su'aalaha P-EBT?

Dhammaan su'aalaha xaq-u-yeelashada P-EBT ayaa waxaa loogu hagaajin karaa Xarunta Xiriirka P-EBT lambarkan 833-518-0282.

### 26. Kumaan wacaa haddii aan rabo in la ii sameeyo PIN-ka?

Marka aad hesho kaarka cunugaaga, qoysasku waxay ka waci karaan shirkadda iibisa EBT lambarkan 888-328-9271 si ay idinku sameyso PIN-ka.

### 27. Kumaan la xiriiraa haddii aanan helin kaarkeyga P-EBT iyada oo sabab u ah cinwaankeyga oo aan beddelay?

Qoysasku waa in ay Xarunta Xiriirka P-EBT ka wacaan 833-518-0282 si ay u helaan caawimaadda beddelka cinwaanka.

## Adeegsiga dheefaha P-EBT

### 28. Halkeen ku adeegsan karaa dheefaheyga P-EBT oo maxaan ku iibsan karaa?

U isticmaal kaarkaaga P-EBT sida kaarka amaahda ama sida kaarka Quest EBT. Dheefahaaga P-EBT ayaa cunto looga iibsan karaa inta badan dukaamada raashiinka iyo suuqyada beeralayda. Waxaad ku adeegsan kartaa dheefahaaga P-EBT dukaan kasta ee aqbla EBT, oo ay ku jiraan kuwa baraha internet-ka wax ku iibiya ee ka-qaybgalaya. Tafaariiqleyda intooda badani waxay leeyihiin calaamado sheegaya in ay aqbalaan EBT. Dheefaha P-EBT ayaa loo adeegsan karaa in lagu iibsado cunto kasta ee lagu iibsan karo SNAP EBT. Cuntooyinka u-qalma EBT waa cuntooyinka intooda badan, marka laga reebo cuntooyinka diyaarsan iyo cuntooyinka la iibiyo iyaga oo kulul. Waxaad oggaan kartaa wax badan oo ku saabsan cuntooyinka u-qalma EBT adiga oo booqanaya Maxaa SNAP lagu Iibsan karaa?

### 29. P-EBT ma loo adeegsan karaa dheerigelinta khudaarta iyo miraha ah?

Haa. Qoysaska ayaa ku adeegsan kara dheefahooda P-EBT barnaamijyada dhiirrigelinta khudaarta iyo miraha ee ka-qaybgalaya Suuqa U-dhigma SNAP iyo Tacabka U-dhisma SNAP. Barnaamijyadan ayaa qoysaska u oggolaanaya in ay sare u qaadaan qaddarka miraha iyo khudaarta ay ka heli karaan suuqyada beeraleyda iyo dukaamada khudaarta iibiya ee ka-qaybgalaya. Wax badan ka oggow Barnaamijyada U-dhigma SNAP.

### 30. Ma tahay in aan adeegsado dhammaan dheefaheyga P-EBT marka aan helo?

Maya. Dheefaha waxay u wareegayaan min bil ilaa bil. Dheefahaaga P-EBT ayaa waxay ku jiri doonnaan kaarkaaga ugu badnaan 274 maalmood min hawlgalkaaga ugu dambeeya laga soo bilaabo taariikhda bixinta. Ha iska tuurin kaarkaaga P-EBT. Inta ay jirto xaaladda degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha ee COVID-19, waxaan koontadan iyo kaarka ku bixin karnaa dheefaha P-EBT oo dheeraad ah.

### 31. Ma tahay in aan ku sameeyo PIN-keyga kaarkeyga P-EBT taariikh gaar ah?

Haddii kaarka aan biin loo yeellin oo dheefahana lagu adeegsan 274 maalmood gudahooda ka-dib marka la bixiyo, meesha ayaa laga bixin doonna lama soo celin karo. Qoysaska waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay sameystaan PIN-kooda oo ayna u hawlgeliyaan dheefahooda P-EBT sida ugu dhakhsiyaha badan ee ay u helaan kaarka, balse ma jirto taariikh kama dambeys ah oo loo qabtey in la sameeyo PIN-ka ama la-hawlgeliyo kaarka P-EBT.

### 32. Sideen ku hubiyaa baaqigayga ama inta iigu hartay?

Waxaad ka waci kartaa iibiyaha EBT, FIS, lambarkan 888-328-9271 (oo ah lambarka ku qoran xagga dambe ee kaarka P-EBT) si aad u eegto baaqiga inta kuugu hartay, ama booqo www.ebtEdge.com ama ku soo-deji barnaamijka ebtEdge telefoonkaaga gacanta.

### 33. Qof ayaa isticmaaley dheefaheyga. Miyaa la ii soo celin karaa?

Maya. Ma soo celin karno qiimaha dheef kasta ee la isticmaalay. Aad iyo aad ayay muhiim u tahay in aad doorato PIN amaan ah oo fudud in la xusuusto balse aan caadi ahaan loo adeegsan. Haddii kaarka lagaa xado ama uu kaa lumo, waxaan kugu dhiirrigelinaynaa in aad si degdeg ah ugala xiriirto iibiyaha EBT, FIS, lambarkan 888-328-9271 si aad u nasakhdo kaarkaaga isla-markaana u codsato mid cusub. Haddii aad tuhunto khiyaanno, ka wac Khadka Tooska ah ee Khiyaannada Daryeelka Bulshada ee Gobolka Washington 800-562-6906.

## Macluumaadka Kale ee P-EBT

### 34. Kuma jiri barnaamijka gargaarka cuntada, laakinse waxaan haystaa cunug da'diisu ka yar tahay 6 jir oo gurigeyga jooga miyaad dib u codsadaa?

Waxaad ka waci kartaa Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada si aad u codsato dheefaha Cuntada Aasaasiga ah 877-501-2233 ama booqo www.washingtonconnection.org. Haddii la go'aamiyo qoyskaaga in uu xaq u leeyahay Gargaarka Cuntada Aasaasiga ah, dheefaha P-EBT ayaa si gaar ah dib-u-eegis loogu sameyn doonnaa.

### 35. Ma jiraan dheefo cunto kale oo hadda la heli karo?

- Qalabka Lagu Oggaado Goobaha Cuntada ee Xagaaga ee USDA ayaa qoysaska ka caawin kara in ay oggaadaan goobaha cuntada siiya carruurta. Ka-qaybgalka adeegyadan raashiinka ama cuntada carruurta xaqa u leh kama hor istaagayaan in ay helaan dheefaha P-EBT. Barnaamijyadan raashiinka ayaa waxaa heli kara dhammaan carruurta ay da'doodu tahay 18 ama ka yar, iyada oo aan la tixgelinayn iskuulka ay dhigtaan. Qoysaska ayaa sidoo kale waci kara 1-866-3-HUNGRY (1-866-348-6479) ama 1-877-8-HAMBRE (1-877-842-6273) si ay u oggaadaan goobaha u dhow inta lagu guda jiro billaha xagaaga.
- Waxaad booqan kartaa www.washingtonconnection.org si aad u codsato dheefaha Cuntada Aasaasiga ah.
- Haddii aad haysato carruur yaryar, waxaad sidoo kale xaq u yeelan kartaa barnaamijka Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta ama WIC, kaas oo gargaar cunto siiya carruurta jirta ilaa iyo da'da 5 iyo haweenka uurka leh iyo hooyooyinka naas-nuujiya. Macluumaad dheeraad ah ka hel https://www.doh.wa.gov/YouandYourFamily/WIC.